

Degmada Spånga-Tensta waxay kala shaqaynaysaa Studiefremjandet in xalqadaha aqoon isweydaarsiga ee "Älskade barn" lagu qabto lookaallada iskuullada iyo xannaanooyinka.

Adigu, waalid ahaan, waxad ka qaybgelaysaa aqoon isweydaarsiga waxanad la kulmaysaa waalidiin kale oo qoomiyado iyo luqado kale ka soo jeeda.

Xalqadda aqoon isweydaarsiga waxa isla samaynaya waalidiinta iyagoo adeegsanaya af iswiidhish laakiin ereyada iyo ereybixinta muhiimka ah waa la isu turjumayaa.

Waxad yeelan xiriir ballaaran oo ilmahaaga quseeya, taas oo keenaysa in xasilloonida ilmuhu waynaato.

In aad xoojiso kaalintaada waalidnimo, waxanu filaynaa inay kugu dhiirriso oo ku tusto fursado aad siyaabo kale oo fiican ugaga qaybgasho abaabulka wax loogu qabanayo ilmahaaga, marka ay ku jiraan xannaanada iyo marka ay iskuulka bilaabaan iyo wakhtiyadooda fasaxaba.

*Vi främjar migrationens möjligheter genom att driva projektet "Älskade barn i skolan och förskolan" – föräldraintegration.*

Spånga-Tensta stadsdelsförvaltning  
Avdelningen för stadsdelsutveckling  
Box 4066  
163 04 Spånga  
Telefon 08-508 03 025  
Anne.marie.flood@stockholm.se



Haddii aad tahay  
waalid ku cusub  
Iswiidhan

**"Älskade barn i förskolan"**  
Wada shaqayn ka dhaxaysa  
degmada Spånga-Tensta iyo  
Studiefremjandet, Stockholms län

## Xalqado aqoon isweydaarsi oo quseeya waalidiinta ka soo jeeda dhaqammo kale oo aan ka Iswiidhishka ahayn.

Waalidiintu waxay ka wada sheekaysanayaan oo waayo-aragnimooda isku waydaarsanayaan ahaanshaha ay yihiin waalid ku nool dal cusub oo carruuri u dhigato xannaanada iyo iskuulka.

*Waalidiintu waa cidda ugu muhiimsan ilmo kasta noloshiisa!*



## Adigu waalid ahaan waxad uga qaybqaadan kartaa laba siyood mid ahaan:

### **In aad hoggaamiso xalqad aqoon isweydaarsi**

Waanu ku raadinaynaa adigaaga xiisaynaya in aad barato sida loo hoggaamiyo xalqad aqoon isweydaarsi, isla markaana ku fikiraya in aad waalidiin kale u hoggaamiso xalqad ama xalqado aqoon isweydaarsi ah.

### **In aad ka mid noqoto xalqad aqoon isweydaarsi ah**

In uu qofku waalid ku noqoto waddan ku cusub, waxay keenaysaa in uu la kulmo caqabado badan. Waxay noqon karaan caqabadahaasi xagga xannaanada carruurta, iskuulka, caafimaadka iyo arrimo kale oo caadi la ah qofkii deggenaa halkan weligii. Markaa waxa aad u fiican in aad la kulanto waalidiin kale si aad uga doodaan arrimahaas.

Xalqadda aqoon isweydaarsigu waxay ka koobantahay lix kulan. Xalqad kastaana waxay leedahay mawduuc. Muhiimaddu waa wadhadalka ku saabsan mawduucyadaas iyaga ah ah.

